



Digniinta Khatarta ee DOSH

Ka caawinta loo shaqeeyaasha kahortaga dhaawacyada goobta shaqada

Feebaraayo. 25, 2022

Isticmaalka Qalabka neefta si looga hortago COVID-19 inta Lagu jiro SHaqaaale Yari Daryeelka Caafimaadka

Fiio gaar ah: Loo shaqeeyaasha ay u joogaan shaqaale ka shaqeeya isbitaallada, xarumaha caafimaadka, daryeelka mudada dheer iyo xarumaha kale ee caafimaadka

Khatarta dheeraadka ah ee COVID-19

Sabab la xariirta shaqaale yari ka jirta xarumaha daryeelka caafimaadka, shaqaalaha uu ku dhaco cudurka COVID-19 ayaa ku laabanaaya shaqada ayagoo wali cudurka faafin kara. Tani waxay kordhinaysaa khatarta faafinta COVID-19.

Shuruudaha iyo Talooiyinka Qalabka Neefta

L&I (Waaxda Shaqada ee Shqada iyo Shaqaalaha) ee Waaxda Caafimaadka iyo Badqabka (Division of Occupational Safety and Health (DOSH)) qalabka neefta oo la xaqiijiyay inay qofka le'eg yihiin inuu isticmaalo shaqaale kasta oo soo gala qolka bukaan looga shakiyay ama la xaqiijiyay inuu qabo COVID-19.

DOSH ayaa ku talinaysa, laakiin qasab kama dhigayso, qalabka neefta oo la xaqiijiyay inuu qofka le'eg yahay inay xidhaan shaqaalaha ka dhex shaqaynaaya dhismaha ay joogaan shaqaalaha looga shakiyo ama laga helo COVID-19.

Barnaamijka agabka neefsiga oo buuxa, ayna ku jiraan qalab qofka lagu cabiray, ayaa qasab ah marka loo shaqeeyaashu ay ka doonayaan in shaqaaluhu adeegsadaan qalabka neefta oo ah qalabka Difaaca qofka (Personal Protective Equipment, PPE) — ayadoon laga eegayn in DOSH qasab ka dhigayso ama aysan ka dhigayn qalabkaas.

Qalabka neefta — Dookha Ugu Badqabka badan

Agabka neefta ayaa la hubiyaa lana sharciyeeyaa si loo xaqiijiyay inay leeyihiin heerka difaaca sareeya ee la isku halayn karo oo ay helaan dadka xiran — heer aad uga sareeya maaskarooyinka wajiga (tusaale, maaskarooyinka qaliinka ama caafimaadka) iyo gafuur xirka. Waxa intaas dheer:

- Daraasaadka ayaa muujinaaya in maaskarooyinka N95 ay qabtaan ugu yaraan shaqada ay qabtaan maaskarooyinka qaliinka si loogu adeegsado difaac ahaan, xataa markay leeyihiin shabaqa laga neefsado*.
- Qalabka neefsiga ayaa si buuxda u xira geesaha afka iyo sanko qofka xiran si ka fiican maaskarada ama gafuur xirka marada ah. Ku filnaanshaha xirista waxaa lagu xaqiijin karaa tijaabada le'ekaanta ee qalabka neefta; kaasoo ah wax aan lagu samayn karin maaskarooyinka.
- Maaskarooyinka qaliinka ee N95 (oo leh Ogolaanshaha Maamulka Cuntada iyo Daawada (Food and Drug Administration, FDA ayaa la heli karaa si loo xakameeyo cudurka ama loogu isticmaalo PPE ahaan shaqooyinka difaaca ka dhanka ah fariinka dareeraha la sheego.

*Arag Machadka Qaran ee Badqabka iyo Caafimaadka Shaqada (National Institute for Occupational Safety and Health, NIOSH) publication No. 2021-107 oo ku jira www.cdc.gov/niosh/docs/2021-107. Sidoo kale, qalabka neefta ee leh shabaqa laga neefsado waa inaan lagu adeegsan goobaha caafimaadka ee ay tahay in daawada qaliinka lagu hayo.



Isticmaal Ikhtiyaari ah

Marka loo shaqeeye uu go'aansado in isticmaalka qalabka neefsiga aan loo baahnayn, laakiin shaqaale uu doorbidaayo inuu xidho, shuruudaha isticmaalka ikhtiyaariga ah ayaa ku qabanaaya. Loo shaqeeyaashu waa inay fududeeyaan isticmaalka ikhtiyaariga ah ee qalabka difaaca ama aaladaha si waafaqsan sharciga Sharciga Maamulka ee Washington (Washington Administrative Code, WAC) 296-62-601 ilaa WAC 296-62-60103. www.Lni.wa.gov/safety-health/safety-rules/chapter-pdfs/WAC296-62.pdf#WAC_296_62_601

Hubinta inuu ku le'eg yahay qasab kuma ahan isticmaalka ikhtiyaariga ah, laakiin waa lagu talinayaa si kor loogu qaado difaaca.

Qalabka Neefta oo ah Aalad Difaac

Marka loo shaqeeye uu go'aansado in shaqaalaha qaarkood (tusaale, shaqaale ay suuragal tahay inuu qabo COVID-19) ay qasab tahay inay xidhaan maaskarada N95 ama qalab kale oo neefta ah si uu u noqdo xakamaynta isha cudurka (tusaale, loo xidho inuu difaaco dadka kale) dhammaan shuruudaha soo socda ayaa qabanaaya:

- Loo shaqeeyaasha ayaa ka fakari kara inay si ikhtiyaari ah u isticmaalaan sida ku cad Cutubka 296-842 WAC, ee Xeerka Qalabka neefta. <https://app.leg.wa.gov/wac/default.aspx?cite=296-842>
- Barnaamijka la qafiifiyay ee qalabka neefta ayaa loo baahan yahay (tusaale, isticmaalka N95 barnaamijkaan ayaa ku kooban in la baxsho nuqulka Shaxda 2 ee xeerka qalabka neefta) loo shaqeeyuhuna waa inuu xaqiijiyaa inaan isticmaalku abuurin khatar caafimaad ama badqab.
- Loo shaqeeyuhu waa inuu qoraa in qalabka neefsiga keliya loo adeegsaday inuu xakameeyo cudurka (haddii aan qalabka neefsiga lagu tijaabin inuu qofka le'eg yahay).
- Tijaabada le'ekaanta ayaa lagu talinayaa, maaha qasab.

Caawimaad ka qaado L&I

Webseedka Badqabka COVID-19 ee L&I

www.Lni.wa.gov/COVIDSafety

La xidhiidh L&I

Iimeel ugu dir EyeOnSafety@Lni.wa.gov, ama wac 1-800-423-7233.

Barnaamijka Talo Bixinta

L&I waxay bixisaa talooyin, tababar, iyo caawimaad farsamo oo si bilaash ah lagu siinaayo loo shaqeeyaasha. Hel xog dheeraad ah oo mudayso talo bixin qarsoodi ah oo bilaash adoo booqanaaya www.Lni.wa.gov/SafetyConsultants.